




# Maalinta Talaadada ah, ee 14-ka Oktoober, Codkaaga dhiibo.

Doorasho guud oo federaalka ah ayaa dhici doonta 14-ka Oktoobar, 2008.

## Ma heshay kaarkani?



**Heyso kaarka codbixiyaha lagu wargelinaayo ee laguugu soo diray boostada, kaagana yimid Elections Canada.**

Waxaa uu kuu sheegayaa halka aad ka codeyn doontid iyo waqtiga aad codeyn doontid. Si dhakhso leh ayaad uga gudbi doontaa hawsha codeynta haddii aad haysato kaarka codeynta.

**Haddii aadan helin kaarkaasi isaga ah,** ama haddii aad ku aragtay qalad lagu sameeyay magacaaga ama cinwaankaaga, fadlan telefoon u dir xafiiskaaga maxalliga ah ee Elections Canada. Waxaa aad lambarkiisa ka heli doontaa [www.elections.ca](http://www.elections.ca) adiga oo gujinaaya halka ay ku qoran tahay “Addeegga Macluumaadka Codbixiyaha” (“Voter Information Service”).

## Halkeebaa laga codeynayaa Goormaase codka la dhiibanayaa?

**Codbixinta Hormariska Ah Waad codeyn kartaa ka hor inta aan la gaarin maalinta codbixintu qabsoomayso.** Codbixinta Hormariska Ah waxa la qabanayaa maalinta Jimcaha bisha Oktobarna ay rahay 3, iyo maalinta Sabtida, Oktobarna tahay 4, iyo Maalinta Isniinta bisha Oktoobarna ay tahay 6, laga bilaabo xilliga duhurka ilaa iyo 8:00-da fiidnimo. Meelaha Codbixinta Hormariska Ah lagu qabanayo (advance polling stations) waxa ay ka muuqdaan kuna qoran yihiin dhabarka kaarka Wargelinta/Macluumaadka Codbixiyaha.

**Codbixintaada waxa aad ku soo diri kartaa boostada** ama waxa aad ka dhiiban kartaa xafiiska qaabilsan Elections Canada ee xaafadda aad degan tahay adigoo isticmaalaya warqadaha doorashooyinka ee khaaska ah haddii aad codsatid waqti ku eg ilaa iyo 6:00 galabnimo ee maalinta Talaadada ee 7-da bisha Oktoobar.

Si aad ula soo baxdid foomka isdiiwaangelinta, tag [www.elections.ca](http://www.elections.ca), dabeetana guji “Waxa aan boostada ku soo dirayaa Codkeyga!” (“I’m Mailing My Vote!”), ama wac Elections Canada si aad u heshid foomka iyo macluumaadba.

## Ma ogtahay shuruucda cusub ee aqoonsiga kuna saabsan sidaan u codeyn lahayd?

Marka aad codeynayso, waxaa khasab ah inaad caddeeyso aqoonsigaaga iyo cinwankaagaba.

Liistada waxyaabaha aqoonsi ahaan loo aqbali karo ee uu ansixiyay Sarkaalka Sare ee Kanada u qaabilsan doorashooyinka (Chief Electoral officer of Canada), fadlan arag buug-yaraha aad boostada ka heshay ee ay kuu soo dirtay Elections Canada ama booqo [www.elections.ca](http://www.elections.ca) dabeetana guji “Aqoonsiga Codbixiyaha ee Meelaha Laga Codeynaayo” (“Voter Identification at the Polls”).

- Si aad u codeyso, waa inaad:
- Haysataa dhalashada Kanada
  - Tahay qof ugu yaraan da’diisa tahay 18 sano maalinta doorashada
  - Caddeyn karto aqoonsigaaga iyo cinwankaagaba

## Codkaaga dhiibo. Adduunkaaga muuq u samee.

[www.elections.ca](http://www.elections.ca)

1-800-INFO-VOTE  
1-800-463-6868

lambaradani waa lacag la'aan Kanada gudaheeda iyo Mareykankaba, ama 001-800-514-6868, oo Meksiko (Mexico) gudaheeda lacag la'aan ah.



TTY 1-800-361-8935

ahna telefon loogu talo galay dadka dhegoolaha ah ama dhego-culus (aan hagaag wax u maqlaynin); lambarkanina waa bilaash Kanada gudaheeda ama Mareykankaba, ama 613-991-2082 oo meel kasta oo adduunka ka mid ah laga soo wici karo.

